REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT.

REF JSL/M/DEC/222-023/42000 DATE 16 April 2000

DECREETO MADAXWEYNE NO:23/2000

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 82aad ee Dastuurka dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu tixgeliyey: Ogolaanshihii Golaha Wasiirada fadhigoodii No: 49aad ee 10/8/98- Xeerka Lahaanshaha Dhul-beereedka -.

Markuu helay: Go'aanka No... GW/KF-=8/95/99 ee 11/07/99 ee uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey xeerka lahaanshaha dhul-beereedka.

Wuxuu soo saaray

Dekreetadan lagu baahinayo dhaqan-galka xeer No: 08/99 ee 11/07/1999 ee lahaanshaha Dhul-beereedka.

Allaa Mahad Leh,

Maxamed Ibraahim Cigaal
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Jamhuriyada Somaliland
GOLAHA WAKIILADA
Xarunta, Hargeysa

Republic of Somaliland
HOUSE OF REPRESENTATIVES
HQ, Hargeisa

Our ref: GW/KF-8/-95-/99.

Date: Har/-11-07-99ka.

GO'AAN ANSIXIN XEERKA LAHAANSHAHA DHUL-BEEREEDKA JSL (XEER.LR.08).-

GOLAHA WAKIILADA JSL

MARKUU ARKAY : Qodobada 16 (2) iyo 47 ee Dastuurka Jsl.

MARKUU TIXGELIYEY : Soo jeedinta Guddiga Arrimaha Bulshada ee ku saabsan xeerkan.

MARKUU AQOONSADAY : Baahida loo qabo xeer noocan ah oo lagu furdaamiyo mushkiladaha iyo muranka ka abuurma lahaanshaha dhul-beereedka Jsl.

MARKUU WAX KA BEDELAY: Qodobada qaarkood, una habeeyay si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Dalka Jsl.

MARKUU U CODEEYEY : Ansixinta xeerkan, fadhigiisii maanta II/7/99 oo ay goob joog ahaayeen 42 mudane.

Wuxuu cod aqlabiyad ah (30-cod) oo gacan taag ah ku ansixiyay xeerka lahaanshaha dhul-beereedka Jsl (Xeer Lr.08), halka 6 Mudane ka diiden 5 Mudene oo kalena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna aanu cod bixin sida caadada ah.-

(Axmed Maxamed Aadan)
-GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA-

(Maxamed Xuseen Cismaan)
-XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADDA-

Jamhuuriyada Somaliland

Golaha wakiilada

Xeer/Lr.08/99. **Har/11/07/99**

Xeerka Lahaanshah Dhul-beereedka

Golaha Wakiilada

Markuu arkay: Qodobada 16(2) iyo 47(1) iyo 14 ee dastuurka jsl.

Markuu Dhagaystay: Soo jeedinta Gudiga bulshada ee golahu soo ban dhigeen eek u saabsan xeerka.

Markuu Ku Qancay: Baahida Looqabo xeer noocan ah oo Lagu Furdaamiyo Mushkiladaha iyo miranada ka abuurma Lahaanshaha Dhulbeereedka.

Markuu U Habeeyay: Sida Waafaqsan Shareecada Islaamka,Dastuurka,iyo Caqliga Fayow.

Wuxuu ansixiyay Xeerka

Qodobka 1aad

Qeexid Erayada Hoos Ku Qoran Waxa Loola Jeedaa Sida Soo socota

1. **Dhul beereed=** Waxa Loola Jeedaa Dhulkasta oo ku haboon in wax Laga beero.

2. Lahaansho= Waxa Loola Jeedaa Lahaanshaha Dhul Beereedka.

3. Mulkiyad= Waxa Loola Jeedaa Warqada Lagu cadaynaayo xaqa Lahaan shaha Dhul beereedka.

4. Wasiir= Waxa Loola Jeedaa Wasiirka Wasaarada Beeraha.

5. Xeer Nidaamyo Dawladeed= Waxa Loola Jeedaa Xeer Nidaamiyaha Dawladeed ee Lagu Fasili Doono Laguna Fulin Doono Sharcigan.

6. Qoys= Waxa Loola Jeedaa xees Ka kooban nin iyo haweenaydiisa iyo caruurtooda aan qaan gaadhin.

7. Shirkad= waxa Loola jeedaa dad iskudarsaday hantidoodii ¾ gashanaaya Dhul beereedka.

8. Masuul= Waxaa loola jeeda madaxa qoyska beerta kunool.

9. Ruqsad= waxa Loola Jeedaa Qofka Beerta Qabsaday Inta aan Lasiin mulkiyada.

Qodobka 2aad
Lahaanshaha dhulka

Iyadoo latex galinaayo sida uu qorayo sharciga**n** la-haanshaha dhul-beeredka jamuuriyad somalilad,hala lahaado ama yaan la lahaan guud ahaan dhulka waxa ka masuul ah dawlada qofku wuxuu yeelanayaa dhulbeeredka malka lasiiyo milkiyada

Qodobka 3aad
Maamulka dhulka

Wasiirka wasaaradda beeruhu wuxuuu awood uleeyahay kor meerida dhul beeredka isagaana dawlada uga masuula dhul beeredka.

Qodobka 4aad
Bixinta mulkiyada

Marka waaxda dhulka iyo biyaha ee wasarada beeraha iyo deeaganku ay soo diyaariso mulkiyadda waxa loogud binayaa wasiirka beerah isagoo hubinaaya lahaanshaha kadibna oggolaanshaha bixinta mulkiyada ku soo celinaya waaxda dhulka ee wasaarada beeraha si ay u dhamays-tiraan diiwan galinta beerta

Qodobka 5aad
Dhulkii hore loo haystay

1. Dadkii hore dhul beeredka u lahaan jiray waa in ay mulkiyada way diistaan wasaarada beeraha sanad gudihii laga bilaabo taariikhda sharcigani dhaqan gali doonosi dhulka ay haystaan loogu diiwan galiyo .
2. Dadka diiwaan galin waaya dhul beereedkoda mudada kor ku xusan waxa laganaa xayaa marka koowad 50,000/=sh.sl marka labaadna 100,000/=sh.sl intaa dabadeed waxay waa yayaan rukhsadda .
3. Dhulbeeradka la siinayo shirkad,iskaashato iwm waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah.

Qodobka 6aad
Nidaamka bixinta mulkiyada

1. Qoys ama qofkastaa waxaa dhulaka cusub loo sinkaraa hal mulkiyad oo keli ah
2. Dadkii hore beero uhaystay waxaa la siinayaa kolba inta mul kiyadood ee uu yeesho dhulkoodu.

Qodobka 7aad
Baaxada uuyelan karo dhulka labixinaayo

1. Baaxadda dhul beeredka cusub ee mulkiyada la siinaayo qof ama qoys ee ugu saray saa (maximum)waa 8 hektar dhulka roob falatada ah 4 hektar dhul waraab ka ah
2. Baaxada dhulka beer falatada eek or ku sheegay kuma saabsana beeraha dawlada ,dawlada hoose,wakaaladaha madaxa banana iyo shirkadaha.

Qodobka 8aad
la wareegidda Dhul danGuud awgeed

1. Dhul kasta oo beeran ama labeeri jiray waa lala wareegi karaa danta guud awgeed.

2. Dhul beered ka dan guud awgeed loola wareego cidii lahayd waa in loo magdhabaa,mudo sadex bilooda gudahood ahna lagu siiyo magdhow u dhigma dhulbeeredka lagala wareegayo.

Qodobka 9aad
Waxyaabah ka reeban mulkiyada dhulka

1. mulkiyadda dhulkalagu bixiyo waxaa ka reeban in uu seero ka dhigo.

2. mulkiyada dhulka cusub lagu bixiyay waxaa kareeban in in la iibiyo mudo saddex sanno ah, mudadaa kadib waa la iibin karaa marka oggolaansho laga helo wasaarada beeraha.

Qodobka 10aad
Xuquuqda uuleeyahay qofka Dhulka qodayaa.

Qofka dhulka qodayaa waxa uu xaq u leeyaha.

1. In dhulka uu beero waxana ka soo saaro.
2. In uu beerta qiimaheed amah ahaan kaga qaadan karo lacag ahaan bangiyada dalka.
3. In uu lacagta ku baxday beerta iyo wixii la xidhiidha hadii aydibada ka timaad inuu xaq uyeelan karo in lagu dhaqo sharciga lacag galinta oo xaq usiinaya in qaar kamida ah faa idada kahelo beerta inuu dibada udiran karo.
4. Dhul beered kaa waa uu iibin kara, kirayn karaa xataa wanu wareejin karaa marka laga reebo tan ku xusan qodobka sagaalad

Qodobka 11aad
Waajibadka saaran qofka dhulka qodaya

Qofka dhulka qodaya waxaa saaran waajibadka hoos ku qoran

1. In aanu dhulka u isticmaalin si kaduwan shuruudihii lagu siiyay
2. In uu dhulka u falo sida ugu fiican isagoo kor dhinaya wax soosarka
3. In uu siiyo hadii ay jiraan shaqaalaha ushaqeeya mushahar uqalma shaqadooda sida uu qoraayo sharciga shaqaalaha dalka uyaala
4. In uu bixiyo cashuurta dhulak ee lagu shegay sharcigan ama kuwa uu qoridooni xeer nidamye dawladeed

Qodobka 12aad
Ka qaadida mulkiyada

Waxaa qofka mulkiyada dhulka looga qaadi karaa markii lagu helo sababahan soosocda;

1. Markii ay dawladu dhulka lawareegto sida uu qorayo qodobka sideedad ee sharciga kadib .
2. Marka qofka dhulka lasiiyay uu sharcigan am xeer nidaamiyihiisa ku xad gudbo laba ganaax kadib.
3. Marka qofka dhulka qodi waayo sadex sano oo isku xiga laga bilaabo taariikhdii mulkiyada lasiiyay.

Qodobka 13aad
Dhaxal

1. Marka uu dhinto qofka mulkiyadda dhulka lasiiyay,malkiyada dhulku waxay ku wareegay dadka dhaxal kiisa leh sida shareecada qeexaso.

2. Markaas oo kale diiwan ka dhulka ayaa lagu qorayaa dadka dhaxalka uhelay mulkiyad dhulka siduu qorayo shar cigani .

Qodobka 14aad
Cashuurta iyo kharashka kale

Bixinta cashuurta

1. Qof kasta oo dhulka ku dhaqan waxaa waajib ku ah in uu bixiyo cashuurta dawlada.
2. Cashuurta dhulka waxaa loo eegi doonaa sida beeruhu ukala wayn yihin iyo noca ay kalayihin.
3. Shuruudaha bixinta cashuurta iyo habka lagu bixinaayo waxaa lagu sheegi doona xeer nidaamiye dawladeed

Qodobka 15aad
Kharshka lagu hagaajinayo dhulka

Dhulka mulkiyad lagu bixiyay hadii ay hore u hagaajisay dawlada hoose,ama wakaaladaha madaxa banana , kharash ka waxaa bixinaaya qofka milkiyada la siiyay.

Qodobka 16aad
Diiwan galinta dhulka

1. Wasaradda beeraha waa in ay leedahay khariirad tilmaameed iyo diiwan ku saabsan dhulka beeraha oo lagu qorayo dadka dhulka la siiyey magic yadooda iyo shuruudaha lagu siiyay mulkiyad dhulka.
2. Wakiilka dagmo walba u jooga wasaarada beeraha wuxuu diiwan galinayaa dhulka beeraha dagmada ku yaala.
3. Iyadoo la tixgalinayo sharcugan wixii lagu qorayo diiwanka dhulka waxaa sal dhig unoqonaya muliyadda dhulka.
4. Marka la ogolaado wixii lagu qorayay diiwanka,qofka dhulka leh waxaa la siinayaa shahaado muujinaysa wax allaala wixii kusab saabsan dhulka mulkiyada loo siiyay.
5. Wakiilka wasaarada beeraha u jooga degmada wuxuu ugu dambeyntii ugudbinayaa wasaarada beeraha nuqul ku saabsan cadaynta beerta.

Qodobka 17aad
Kala xadynta dhul beereedka iyo dhul daaqeenka

1. Dhul daaqenka jsl,lagama bixin karo beer-roobad .
2. Beer biyood waalaga bixin karaa dhul daaqeen ka hadii aanay xidhnayn ama wax u dhimayn wadooyinka xooluhu ka arrooran iyo sabada ceelasha ee xooluhu joogsadaan.

Qodobka 18aad
Ciqaabta

Waxaa lagu faafinayaa xeer nidaamiye dawladeed.

Qodobka 19aad
Awood.

Maxkamadda sharciga ah ayaa awood u leh inay qaadan dacwooyin ka ku saabsan sharcigan.

Qodobka 20aad
Xeer nidaamiye dawladeed

Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.

Wuxuu awood uleeyahay in uu soo saaro xeer nidaamiye dawladeed oo lagu faahfahin doono sharcigan isaga oo tix galinaaya talada uu soo jeediyay wasiirka wasiirka wasaaradda beeruhu.

Qodobka 21aad
Tirtir

Waxa latir tirayaa sharci kasta oo ka soohor jeeda ama aan la socon karinsharcigan,marka lagareebo shareecada islaamka iyo dastuurka.

Qodobka 20aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka madaxwaynuhu saxeexo laguna soo saro fariinta rasmiga ah ee dawladda, ansixinta barlamaanka dabadeed.

ALLAA MAHAD LEH.